**Jamhuuriyada Somaliland**
**Dawladda Hoose Ee Hargeisa**
**Aggaasimaha Dhulka D/Hoose Hargeisa**

**Ref/DH/GHDDH/0065/2024**

**Date: 17th /3/2025**

**Ku:Maamulka Geosol** **=Hargeysa=**
**Og: Xoghayaha Fulinta Dhh** **=Hargeysa=**
**Og: K/X/ Duqa Caasimada Jsl** **=Hargeysa=**
**Og: Duqa Caasimada Jsl** **=Haregysa=**

## Ujeedo: tirtirid file

**Mudane**

Anigo tixraacaya go'aanka sumadiisu tahay **go'aan LR:41/2025** kuna taarikhaysan **10th march 2025** waxan halkan idiinku soo gudbinaya **tirtirida file-ka** leh **TR-49969.**

Fiyl-kan oo ku qoranyahay muwadinka magaciisu yahay **Aadan Daahir Maxamed** kaaso cabirkiisu **48*90M** kuna yaala degmada **A/dhagax** gaar ahaan xaafada masalaha galbeed .

Sidaad darteed waxaan soo jeedinaya in la **tirtiro file-ka** leh **TR- 49969**kaaso uu ku qoranyahay muwadinka magaciisu yahay **Aadan Daahir Maxamed** iyado loo raacayo go'aanka guddida fulinta.

**Signature**

**Axmed Jaamac Aadan**
**Aggasimha Waaxada Dhulka**

Email: axmed631@mail.com

Tell: +252-634441845

Jamhuuriyada Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Duqa Caasimadda

Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa
Mayor's Office

Go'aan Lr: 41 /2025.

Date: 10th March 2025.

## Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa **10th March 2025**, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargaysa Mudane **(C/kariim Axmed Mooge)**, Kuna saabsanayd Tirtiris/Cancelled iyo samayn fayl cusub, Dood & falan-qayn dheer ka dib: -

## Guddida Fulintu-

| | |
|---|---|
| **Markay Arkeen** | Amarka Maxkamadda ee sumadiisu tahay **MGH/DFL/755/2024**, kuna taariikhaysan **30/01/2024**, ujeedadiisu tahay amar tirtiris Faylka Tr. numberkiisu yahay **Tr: 49969**, ee uu ku qoran yahay **Aadan Daahir Maxamed**, dhulkan oo cabirkiisu yahay Hal Baloog(48m*90m) ku yaala Degmada Axmed Dhagax. |
| **Markay Arkeen** | Amarka Maxkamadda isla qoraalkan summadiisu sare ku xusan tahay, ee Dawladda Hoose lagu Amraayo in ay Fayl cusub usameeyaan ninka Magaciisu yahay Maxamed Axmed Idiris. |
| **Markay Xaqiiqsadeen** | In ay waajib tahay in ay qaataan amarka Maxkamadda isla markaana tixgaliyeen duruufaha ku xeeran ninka loo samaynaayo faylka cusub oo dhalasho ahaan ka soo jeeda wadanka Bangaaladheesh oo ay adagtahay in uu damaaciyo dhul aanu lahayn maadaama oo uu yahay Ajaanib. |
| **Markay Tixgeliyeen** | Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso. |

## Waxa ay Go'aansadey: -

Ka dib markii ay arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Guddiga fulintu wuxuu Go'aansadey in la tirtiro File **Tr: 49969** ee uu ku qoran yahay **Aadan Daahir Maxamed,** isla markaana loo sameeyo Fayl Sharciya oo dhamaystiran ninka magaciisu yahay **Maxamed Axmed Idiris,** sidaa darteed waxaanu faraynaa dhamaan Xafiisyada ay khusayso in ay go'aankan dhaqan galiyaan.

Allah Mahad leh.

**(Siciid Nuur Jaamac).**
**Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa**

**(Khadar Axmed Cumar Khadar Nuur)**
**Ku-xigeenka Duqa Caasimada Hargeysa.**

**(C/kariim Axmed Mooge).**
**Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Gudd**
**Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.**

JAMHUURIYADDA SOMALILAND — REPUBLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA M-JEEX / REGIONAL COURT M-JEEX

Xafiiska Garsooraha-Number (5)

MGH/DFL/755/2024

30/01/2025

KU:- DUQA CAASIMADA JSL =Hargaysa=

UJEEDO: - AMAR TIRTIRIS FAYAL IYO SAMAYN FAYAL CUSUB.

*Maxkamada Gobolka M/jeex Hargeysa:*

**Markay Aragtay:** Gal Dacwadeedka Fulinta ah Ee Sumadiisu Tahay **MGH/DFL/755/2024**, Kuna Taariikheysan **12/09/2024**, Kaas oo ay dhinacyadiisu sare ku xusan yihiin :-

**Markay Aragtay:** Amarka madax banaanaynta ah ee Maxkamadda Gobolka M/jeex ee sumadiisu tahay MGH/DFL/755/2024 ee ku taariikhaysan **22/12/2024**.

**Markay Aragtay:** Arjiga Codsiga ee Ku Taariikhaysan **28/01/2025**. Soona Galay Maxkamada Isla **29/01/2025**.

## AMARKA MAXKAMADDA

1. Maxkamadda Gobolka M/jeex Waxay kugu amaraysaa in aad tirtirto Faylka TR **No:49969** ee u uku qoran yahay **Aadan Daahir Maxamed**, dhulkaas oo Cabirkiisu yahay **48x90Mt** oo ku yaala Degmada A/dhagax Xaafada Masalah Galbeed.
2. Maxkamadda Gobolka M/jeex waxay kugu amaraysaa in aad ugu samayso dhulkaas fayl cusub Loo-fuliyahay magaciisu yahay **Maxamuud Axmed Idirs** oo ay Maxkamaddu hore ugu madax banaanaysay.
3. Amarkani waxa uu soo baxay maanta oo ay taariikhadu tahay **30/01/2025**.

**Alla Mahad leh**

**(Max'ed Salaan Muxmed)**

**Garsooraha Maxkamada Gobolka M/Jeex** 30/01/2025

**=Hargeysa=**

Maxkamada Gobolka Hargeysa: Head Office Address Near Sha'ab Area Tel. 063-4464658 Facebook Page. **Maxkamada Gobolka Hargeysa.**

18/02/2025

Ku: mo adan →

Wasaad -jowtaa joogo — lagu kingiraayo Tr-ka — maxkamadda soo amartay.